

**Wasiirka Maaliyadda ayaa soo dhaweeyey go'aankii Golaha
Barlamaanku ku ansixiyeen Xubin ka noqoshada Hay'ada Iskaashiga
Islaamka iyo Dhiiri Galinta Ganacsiga 07, Feb, 2016**

07, Feb, 2016....Mogadishu.....Wasiirka Maaliyadda Xukuumadda Federaalka Soomaaliya Mudane Maxamed Aden Ibraahim Ferkeeti ayaa soo dhaweeyey ansixintii Golaha Barlamaanku ay ansixiyeen hindisihii ay soo gudbisay Wasaarada Maaliyada ee ku aadanaa ka xubin noqoshada Hay'ada Iskaashiga Islaamiga iyo Horumarinta (Islamic Cooperation of Development) ICD.

Wasiirka Maaliyadda Maxamed Aden Farkeeti ayaa u mahadceliyey Xubnaha Golaha Barlamaanka, sida wada shaqayntu ku dheehan tahay ee ay u ansixiyeen xubin ka noqoshada Hay'ada Iskaashiga Islaamiga iyo Horumarinta.

“Hay'ada Iskaashiga Islaamka iyo dhiiri galinta Ganacsiga waxay u sahlaysoo Soomaaliya iney fursado u helaan illo dhaqaale oo dibadda uga yimaada taas oo kor u qaadaysaa wax soo saarka, waxayna siinaynsaa taageero shirkadaha ku howlan ganacsiga yar yar iyo kan dhexe, waxaa kale oo ay dhiiri galinaysaa hal buurka ganacsiga, iyo tarntan sare u qaadi kara ganacsiga gaarka loo leeyahay. Ansixinta heshiiska ICD wuxuu awood u siin doona Soomaaliya inaan kor u qaado ganacsiga gaarka loo leeyahay si uu uga qeyb qaadaato shaqo abuurka gaar ahaan dhalinyarada shaqada doonka ah” ayuu yiri Wasiir Ferkeeti.

Hay'ada Iskaashiga Islaamka iyo Horumarinta Ganacsiga waxay taageertaa wadamada xubnaha ka ah iyadoo ka caawisa in ay awood ahaan iyo siyaasad ahaana horumariyaan dhiiri galinta ganacsiga gaarka loo leeyahay, sidoo kale ICD ay kor u qaada asaaska, balaarinta iyo casriyeeynta ganacsiga gaarka loo leeyahay iyadoo u maraysa la talin dadka ku howlan, iyo wadamada xubnaha ka ah, waxaa kale oo ICD balaarisaa kaalmada la siinayo shirkadaha taas oo u sahli karta iney kor u qaadaan ganacsigooda dhanka khibrada iyo xirfadaba, iyo si ay u helaan xiriir caalami ah.

---DHAMAAD---